



## Warbixin loogu talagalay qofka magangalyo-doonka ah: Sidii aad howlahaaga uga dhammeysan laheyd Waaxda socdaalka (Imaagareeshinka)

### Waa muhiib in aad ogtahay:

- Arimahaaga ku saabsan magangalyo-doonka laguugma sheegaayo khadka telefoonka, waayo lama xaqiijin karo qofka telefoonka soo wacaaya aqoonsigiisa dhalasho iyo qofka uu yahay toona.
- Akhri qoraalka adiga lagu siiyay ee warbixinta loogu talagalay qofka magangalyo-doonka ah ([Tieto turvapaikanhakijalle.](#)) Waxaad sidoo kale warbixinno badan ka heleysaa boggeena internetka: [www.migri.fi](http://www.migri.fi).
- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto arimaha magangalyo-doonkaaga, waxaad marka hore la xiriirta qareenkaaga, ama waxaad weydiisaa shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Wixii macluumaadkaaga ku saabsan waxaad ka heli kartaa Waaxda Socdaalka (Imaagareeshinka), adigoo codsigaaga qaab qoraal ah boostada ugu soo diraa, cinwaanka boostadana waa sidatan: Maahanmuuttovirasto, PL 18, 00581 Helsinki.
- Xerada qaxootigu go'aan kama gaari karto codsigaaga qaxootinimada. Sidoo kale wax saameyn ahna kuma yeelan karto wax ka qabashada iyo go'aan ka gaarista codsigaaga

### Waxaad su'aal ka qabtaa wareysiga ku saabsan codsiga magangalyo-doonka

- Waaxda socdaalka (Imaagareeshinka) ayaa ballan kuu qabaneysa, uma baahnid in aad la soo xiriirto Waaxda socdaalka. Iska sug ballanka laguugu yeeri doono, kaasoo laguugu soo diraa xerada qaxootiga. Xerada qaxootiga ayaa kuu sheegeysa warbixinta la xiriirta ballankaas lagu soo tuurey.
- Waraaqda ballanka ee lagu soo tuurey waxaa ku qoran luqadda lagugu wareysanaayo, cinwaanka saxda ah ee goobta wareysiga iyo saacaddaba. Waraaqda laguma qoro magaca turjubaanka iyo kan qofka waraysiga kula yeelanayaba.
- Suuragal ma ahan in waqtiga wareysiga la bedelo. Haddii aad tusaale ahaan xanuunsato, si dhakhso ah ula xiriir shaqaalaha xerada qaxootiga.

### Waxaad dooneysaa qareen kaa caawiya arimaha magangalyo-doonistaada

- Waxaad xaq u leedahay in aad hesho qareen.
- Haddii aad qareen u baahan tahay, waxaad la xiriirtaa xafiiska qareenada. Xerada qaxootiga ayaana arinkaas kaa caawineysa.
- Qareenku sida badan kama qeybqaato wareysiga qofka lala yeelanaayo. Qareenku waxaa loo ogolaanayaa inuu ka qeybqaato wareysi kale oo dheeraad ah, haddii ay jirto baahi weyn oo arinkaas sababi karta. Qareenku isaga ayaa iskiis go'aan uga gaaraya inuu ka qeybgalaayo wareysigaas iyo in kale, xafiiska qareenaduna waxaa ay go'aan ka gaarayaan haddii qareenka lacag lagu siinayo ka qeybgalka wareysigaas dheeraadka ah iyo haddii aan lagu siineynba.
- Haddii aad tahay ilmo da'yar oo aan wali qaangaarin, waalidkiis ama cid ka mas'uul ahna aanay la socon markuu dalkaan imaanaayay, wakiilkaaga ayaa qareenka kuu raadinaya.

### Waxaad dooneysaa in aad warbixin dheeraad ah soo dirto, ama aad ogaato in warbixintii dheeraadka aheyd ee aad soo dirtey ay xafiiska soo gaartay iyo in kale

- Markii aad u baahato arinkaas qareenkaaga ama shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaa caawinaya

### Waxaad su'aal ka qabtaa xuquuda shaqo qabashada

- Warbixinta aad u baahan tahay ee la xiriirta xuquuqda shaqo qabashada waxaad ka heleysaa boggeena internetka ee cinwaankiisu yahay: [http://www.migri.fi/turvapaikka\\_suomesta/tyonteko-oikeus](http://www.migri.fi/turvapaikka_suomesta/tyonteko-oikeus)



- Haddii aad shaqo hesho, qofka shaqada ku siiyay waa inuu iska hubiyaa in xuquuqda shaqo qabashadaadu ay tahay mid shaqeyneysa oo aan dhacsaneyn. Shaqo bixiyuhu arinkaas telefoon ahaan ayuu ku hubin karaa. Lambarka telefoonka waxaa laga helayaa boggeena internetka, waxaana adeegaas loogu talagalay oo kaliya shaqo bixiyayaasha.
- Waxaa sidoo kale adigana kugu waajib ah in aad shaqo bixiyaha u sheegto haddii waraaqda xuquuqda shaqo qabashadu ay kaa dhacsan tahay.

**Wareysigii magangalyo-doonka markii lagula yeeshay kadib, waxaad dooneysaa inaad ogaato halka arinkaaga wax kaqabashadiisu ay mareyso, iyo in go'aan lagaa gaaray iyo in kale**

- Marka wareysiga magangalyo-doonka lagula yeelanaayo, ayaa waxaa lagu siinayaa qiyaasta mudada arinkaaga wax looga qabanaayo, xilligaaso aan muddo cusub oo kale lagu siineynin.
- Haddii mudadii lagu qabtay la dhaafay, qareenkaaga ama shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa markii loo baahdo arinkaas waxaa ay la soo xiriirayaan Waaxda socdaalka (Imaaga-reeshinka).
- Wax kaqabashada codsigaaga waxaa dhici karta in mararka qaarkood ay qaadato in ka badan waqtigii lagu qabtay, waxaad ka eegi kartaa xilliga dhex-dhexaadka ah ee mudada ay qaadato wax kaqabashada codsiga magangalyo-doonka, boggeena internetka: [http://www.migri.fi/nain\\_palvelemme/kasittelyajat](http://www.migri.fi/nain_palvelemme/kasittelyajat).
- Xaaladda codsigaaga marnaba ha la barbardhigin tan dadka kale, waayo wax kaqabashada codsiyadu waxaa ay ku kala duwan yihiin hadba inta muddo ah ee codsigaasi uu u baahan yahay in lagu caddeeyo.
- Haddii ay jirto sabab cad oo keeni karta in codsigaaga la dedejiyo, marka hore arinkaas waxaad kala hadahsaa qareenkaaga, ama shaqaalaha xerada qaxootiga. Codsiga dedejinta waa in qoraal ahaan loogu soo hagaajiyaa cinwaankaan: Maahanmuuttovirasto, PL 18, 00581 Helsinki.
- Telefoonka oo aad kula soo xiriirto Waaxda socdaalka, waxba kuma kordhineyso wax kaqabashada arinkaaga.

**Waxaad su'aal ka qabtaa wax kaqabashada arinkaagii kadib go'aankii ay gaartay Waaxda socdaalka**

- Waxaad la xiriirtaa qareenkaaga ama shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Haddii aad racfaan ama ambiil ka qaadatay go'aankaaga. Wax ka weydiinta arinkaasi waxaa ka jawaabaya hadba qolada xilligaaas ay la taallo wax kaqabashada arinkaaga, tusaa-le ahaan. maxkamadda maamulka ama maxkamadda sare ee maamulka.